



Somali | Soomaali

Mudane/Marwo (title and first and second),

Homes Victoria waxay qoraalkaan kuugu soo diraysaa inay kugula wadaagto warar muhiim ah oo ku saabsan gurigaaga iyo marxaladda xigta ee Mashruuca Dhismaha Weyn.

Bishii Sebtembar ee sanadkii 2023, dawladda Victoria waxay ku dhawaaqday barnaamij dib-u-horumarineed oo weyn si ay dib ugu dhistro 44 daarood oo dhaadheer iyagoona laga dhigayo kuwo casri ah, si sahlan lagu geli karo, oo tamar wanaagsan leh.

Barnaamijkan waxa kale oo qeyb ka ah dib u dhiska qaar ka mid ah guryaha qadiimka ah sida guryo gudaha jarjanjaro ku leh oo ku dhuxyaalla xaafad dabaqyo dhaadheer leh sida Richmond.

Tani waa qayb ka mid ah ballanqaadkeena ah inaan dad badan oo reer Victoria ah siino guryo ka wanaagsan kuwii hore.

Maanta waxaan la xiriireynaa kireystayaasha ku jira meelaha soo socda ee saraha dhaadheer iyo kuwa jarjanjarooyinka gaaban leh si aan idin ogeysiino wadahadalka lagu qorsheynayo dib-u-dejinta inay dhawaan bilaaban doonto:

- **6, 8 Anderson Court, 1, 2, 3, 4, 5, 7 & 9 Williams Court, 111, 119 iyo 27 Elizabeth Street Richmond**
- 139 Highett Street, Richmond
- 259 Malvern Road, South Yarra



Dhismayaasha cusub ee laga dhisayo agagaarka 147 - 161 Elizabeth Street, Richmond waxay keeni doonaan guryo bulsho oo si wanaagsan loo qaabeeeyey, badbaado leh, ammaan ah isla markaasna casriyeysan. Tani waxay noqon kartaa mid ka mid ah fursadaha dib-udejineed ee kuu furan.

Waxa ay tani adiga kaaga dhigan tahay

Dhismaha aad hadda ku nooshahay wuxuu qeyb ka yahay barnaamijka dib u dhiska. Wada hadalada lagu qorsheynayo guuritaanka waxay bilaabmi doonaan dhawaan, si ay guuristaadu u dhacdo ilaa Febraayo 2026.

Waxaan fahamsanahay in tani ay tahay war weyn, shaqaalahayaga guriyeenta maxalliga ah ee u heellan iyo kooxda dib-u-dejinta ayaa halkan u jooga inay kaa taageeraan tallaabo kasta oo aad qaadeyso.

Waqtii xaadirkan, waad is-diiwaangelin kartaa si aad u hesho balan fool-ka-fool ah oo aad uga hadli karto tillaabooyinka xiga iyo sida ugu wanaagsan ee aan kuu taageeri karno, iyo sidoo kale in aad wax badan ka ogaato barnaamijka dib u dhiska adigoo booqanaya bighousingbuild.homes.vic.gov.au ama wacaya 1800 716 866.

Waxa kale oo aad la hadli kartaa xafiiska guriyeynta ee degaankaaga, iman kartaa kal-fadhi macluumaaad, ama waxaad ballan la'aan tagi kartaa xarunta dib u dejinta marka laga furo xaafadaada agteeda, dhawaan.

Sida aan kuu taageeri doono

Waxaan rabnaa in aan ku xaqijino in ay naga go'an tahay in aan guuritaankaaga ka dhigno mid sahlan oo u dhacda sida ugu macquulsan. Waa kuwan waxa aad filan karto:

- **Horay u sii qorshayso:** Wadahadalka ku saabsan qorsheynta guuritaanka waxay bilaabmi doonaan dhawaan, si guuritaankaagu u dhaco Febraayo 2026. Fadlan ka fikir baahiyahaaga iyo dookhyadaada gurigaaga cusub, si aad waxyaabahaas noola wadaagto.
- **Diyaargarowga:** Waqtii xaadirkan, wad is-diiwaangelin kartaa si aad u hesho ballan fool-ka-fool ah oo aad uga hadasho tallaabooyinka xiga iyo sida ugu wanaagsan ee aan kuu taageeri karno.
- **Taageero kugu habboon:** Kooxdayada u qaabilsan rarista ayaa ku taageeri doona si aad u heshid guri waafaqsan baahiyahaaga, oo ay guuristaadana uga dhigaan mid sahlan oo u dhacda sida ugu macquulsan. Waxaan diyaarin doonaa oo aanu bixin doonaa kharashka rritaanka sidoo kalena anaga ayaa tuuri doona wax kasta oo aadan rabin inaad ula guurto gurigaaga cusub.
- **Nagu xirnaw:** Waanu kula socodsii doonaa howlaha qorsheynta ee guryaha dib loo dhisayo.
- **Soo noqoshada:** Dib-u-horumarintu waxay qaadan doontaa inta u dhaxaysa 6 iyo 8 sano. Waxaad xaq u leedahay inaad ku noqoto xaafada aad hadda degan tahay marka dib u dhisku dhamaado iyadoo lagu salaynayo xaq u yeelashadaada, baahiyahaaga iyo ku haboonaanta guryaha cusub. Waxa kale oo aad dooran kartaa inaad degto gurigaaga cusub haddii taasi kugu habboon tahay, wakhtigaas ayada ah.

Waxaan halkaan u joognaa inaan ku caawino

Waxaan fahamsanahay in guuritaanku uu keeno isbedel weyn, waxaanan halkan u joognaa inaan kaa taageerno tallaabo kasta oo aad qaadeysyo. Waxaad ballamahaaga guurista usoo kaxaysan kartaa qof ku caawiya. Tani waxay noqon kartaa:

- Saaxiib ama xubin qoys
- Wakiil ka socda Ururka Kiraystayaasha Dadweynaha Victoria ama Kiraystayaasha Victoria (Victorian Public Tenants Association or Tenants Victoria)
- Sharci yaqaan ku matala oo ay ku jiraan adeegyada sharciga bulshada ama Adeegga Sharciga Aboriginal-ka Victoria.

Waxaan kuu diyaarin doonaa turjubaan haddii aad u baahan tahay, marka aad go'aansato waqtiga aad la hadli doonto kooxdayada dib-u-dejinta.

Homes Victoria hadaan nahay waxaa naga go'an inaan gurristaada ka dhigno mid sahlan oo u dhacda sida ugu macquulsan, waxaan halkaan u joognaa inaan kaa caawinno tallaabo kasta.

Salaan diiran

Dannii de Kretser

Maamulaha ku meel gaadhka ah,
Homes Victoria

Dolek